**Amar L. 4 rep.**
**Xeerarka shaqada dumarka.**

MAAMULAHA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIA

MARKUU ARKAY: dekereetada Madaxweynaha 9kii disember 1952, L. 2367;

TIXGELIYEY: fursada in uu u damaanad qaado shaqaalaha dumarka daryeel wanaagsan ee ballaaran dhanka shaqada, ee ilaalinaayo nolosha iyo caafimaadka sugaayana daryeellaa si waafaqsan tilmaamaha siyaasad bulshadeedka ku qoran heshiiska daryeelka iyo mabaadi'da ku xusan heshiisyada caalamiga shaqada ee jira;

MARKUU ARKAY: Qod. 4 ee baaqa mabaadi'da Dastuuriga ku lifaaqan heshiiska daryeelka ee dhulka Soomaaliya hoos taga Maamulka Taliyaaniga;

MARKUU ARKAY: Qod. 4 ee dekreetada Madaxweynaha ku taariikheysan 9 kii disember 1952, L. 2357;

WUXUU AMRAYAA

**Qod. 1**

Shaqada dumarka ee ka shaqeeya shirkado iyo wakaalado guud ama gaar ah waxaa lagu dhaqaa qodobbada xeerkaan.

Qodobbadaas laguma dabaqaayo markay la xiriiraan:

a) Dumarka ka shaqeeya howlaha guriga;
b) Xasaaska waalidiinta iyo kuwa qaraabada ilaa darajada saddexaad, shaqa bixiyaha, marka ay la noolyihiin ay dul saaranyihiin:
    a. Dumarka ka shaqeeya gurigiisa;
    b. Dumarka qabta shaqooyinka beeraha;
    c. Kuwa tababarka shaqooyinka- dugsiga ee ujeedo dhaqaale lahayn.

**Qod. 2**

Waxaa loo qaadankaraa dumarka shaqada ay qalmaan ee laga helo goobaha shaqada ee xeerkan lagu dabaqi karo, haddii uusan shaqa bixiyaha uusan ku sababayn jiritaankooda sababo macquul ah.

**Qod. 3**
**Howlaha khatarta leh, dhib iyo caafimaad darro leh.**

Way reebantahay in dumarka loo isticmaalo ee da'dooda ka yartahay 18 sano howlaha nadaafada ama shaqada matoorada iyo xubnaha gudbinta a,a gaari kacsan, marka laga reebo shaqooyinka khatarta leh, dhibka badan iyo caafimaad daro leh ee lagu qeexi doono dekereetada Maamulaha, markuu dhageysto sarkaalka caafimaadka iyo sarkaalka dhexe ee shaqada.

**Qod. 4**

**Howlaha dhulka hoostiisa**

Way reebantahay dumarka da’kasta shaqooyinka dhulka hoostiisa ee macdanta iyo godadka.

Diidmadaas laguma dabaqaayo dumarka xilkooda yahay maamul, ama nadaafad iyo kaalmaynta, ama qabanaynin shaqooyin gacanta.

**Qod. 5**

**U qalmidda jir ahan, baaris caafimaad iyo warqadda dhakhtarka**

Dumarka ka yar 18 sano looma qaadan karo shaqo haddaysan u muuqan, marka loo eego warqadda dhakhtarka, inay iyaga yihiin caafimaadqab una qalmaan isla shaqadaas. Marka uu dhakhtarka u arko inaysan jir ahaan u qalmin shaqooyin qaarkood, waa inuu ku caddeeya warqadda dhakhtarka shaqooyinka aan iyaga loo qaadan Karin.

**Qod. 6**

Saraakiisha caafimaadka waa inay fuliyaan barista caafimaad kuna bixiyaan lacag la’aan caddeymaha ku tilmaaman qodobka la soo sheegay.

**Qod. 7**

**Shaqada habeenkii**

Dumarka iyadoo aan da’loo kala saarayn looma shaqaaleyn karo shaqo habeen dhismo warshadeed middona ama wixii la xiriira, inta aan ka ahayn dhismo ay ka shaqeeyaan keliya xubno isla qoyska. Ka reebidda laguma dabaqaayo dumarka u xilsaaran maamul, ama caafimaad iyo gargaar, ee aan qabaneyn shaqo gacan.

**Qod. 8**

Iyadoo loola jeedo ujeedada qodobka la soo sheegay erayga “habeen” wuxuu tilmaama waqti ugu yaraan 11 saac xiriir ah, ka kooban nasasho saacadaha 22 ka iyo saacadaha 5 ta

**Qod. 9**

Diidmada ku xusan qod. 7 aaf laguma dabaqaayo haddii ay timaato arrin ka baxsan awoodeeda ee si dhab ah u xaqiijiyey sarkaalka shaqada iyo mararka ay shaqada ku saabsan tahay alaabta cayriina ah ama inta laga shaqeeynaayo ku timaado u nuglaan isbedel deg deg ah, marka ay tahay lagama maarmaan si loo badbaadiyo isla walxaha khasaare ku timaada aan laga kabsan Karin, iyo marka la qabanaayo shaqooyin saacado xiriir ah, uu oggolaaday sarkaalka dhexe ee shaqada, lagama maarmaan u ah dhaqaalaha dalka.

**Qod. 10**

***Saacadaha Shaqada***

Muddada shaqada dumarka waa sided saacadood maalinle ah. Waa la oggolyahay arrimaha qaarkood dumarka da’dooda ka sarreyso sanadaha siddeed iyo toban sano inay ka gudbaan saacadahaas ilaa laga gaarayo tobanka saac maalinle ah, marka uu oggolaado sarkaalka shaqada.

**Qod. 11**

**Nashada shaqada dhexdhexaad ah iyo toddobaadlaha**

Haddii ay saacadaha shaqada dhaafaan lixda, balse ahayn siddeed saac, shaqooyinkaas xiriirka ahna, waa in lahakiya nasasho meel dhexaad xiriir ah ee muddada ugu yaraan hal saac; haddii ay dhaafto siddeeda saaac, nasashada dhexdhexaadka, waa inay yeelataa ugu yaraan muddo hal saac iyo bar waxaana look ala qeybin kara laba waqti oo aan ka yareyn muddadeeda saac barkiisa. Inta lagu guda jiro nasashada dhexdhexaad ah lama weydiin karo midna waxqabad.

**Qod. 12**

Nasashada toddobaadlaha ee dumarka shaqaalaha waa inuu yeeshaa muddo ugu yaraan 24 saac xiriir ah.

**Qod. 13**

**Ilaalinta muddada dhalmada**

Shaqaalaha dumarka ah eek u xusan qod. 11 ee la soo sheegay lama ruqseyn karo inta ay ku jiraan muddada dhalmada, uu si qoraal ah dhakhtar u hubiyey oo sax ah, ilaa laga gaaro muddada ka fariisinta shaqada, ku xusan qodobka 14 ee xiga, weliba ilaa uu ka gaaro canuga da'da halka sano. Diidmadaas laguma dabaqaayo marka ay:

a. Sababtu ka timaado dhinaca shaqaaladda, keenaysa sabab macquul ah kala go'a xiriirka shaqo;
b. Dhamaadka wax qabadka shirkadda oo ay ka howlgasho.
c. Ugu dambeyntii wax qabadka oo ay shaqaaladda loo gaartay ama kala go'a xiriirka shaqo muddada dhamaadkeeda ee lagu heshiiyey.

**Qod. 14**

Dumarka dhaqeeya waxay xaq u leeyihiin kaddib caddeyn dhakhtar tilmaameysa muddada maleynta dhalmada, ruqsad dhalmo muddo 12 toddobaad ee ugu yaraan lix dhalmada kaddib.

**Qod. 15**

Haddii dhalmada ay dhacdo kaddib muddada la qiyaasaayo, ruqsada dhalmada ka hor waxa dib loo dhigaa ilaa taariikhda dhabta ah ee dhalmada iyo mudda ruqsada eel ix toddobaad kaddib dhalmada hoos looma dhigi karo.

**Qod. 16**

Muddada ruqsada ku xusan qodabb lasoo sheegay, shaqaaladda waa inay ka heshaa, shaqa bixiyaha, mushaarka barkiis ay qaadaneysay dhacdada kala go'a shaqada (bishardi inay ka shaqeysay shaqada ugu yaraan lix bilood oo aan kala go' lahayn oo ka dhalatay arrin kaskeeda ay u sameysay marka laga reebo cudur si dhab ah loo soo xaqiijiyey.

**Qod. 17**

Marka ay dib u bilaabato shaqada muddada ruqsada ee ku xusan qodobbada 14 iyo 15 ee la soo sheegay, shaqaaladda nuujineyso canugeeda waxay xaq u yeelaneysaa, muddo ugu badnaan hal sano laga bilaabo maainta dhalashada, labo waqti maalinle nasasho midkiiba nus saac, si loogu suurtageliyo nuujinta canuga.

**Qod. 18**

Way reebantahay si kastaba shaqada habeenkii dumarka shaqaalaha mudda dhalmada.

**Qod. 19**

Way reebantahay in loo isticmaalo qaadiid ahaan iyo qaadista culeysyada iyo shaqooyinka halis ah, dhib badan iyo caafimaad darro  eek u xusan qod. 3 aad ee la soo sheegay, dumarka shaqaalaha muddada dhalmada, laga bilaabo taariikhda caddeynta uurka la keeno iyo saddex bilood dhalmada kaddib iyo ilaa lix bilood dhalmada kaddib, oo ay si toos ah u siiyaan nuujin canugooda.

**Qod. 20**

**Ciqaabyada**

Qof kasta ee ka horyimaada shuruuda ku xusan xeerkan waxaa lagu ganaaxaa ilaa 500 Soomali ama xarig ilaa saddex bilood. Marka ay intaas ka culus tahay labada ciqaab waa lay sugu daraa.

**Qod. 21**

**Qodobo dhameystir ah**

Maamulaha wuxuu awoodaa, isla dekereetadiisa, soo saaro qodobbo dhameystir ah si loo fuliyo amarkan.

Muqishu, 25kii febaraayo 1954 Maamulaha

Martino